SOMALI

Infosheet 4. International Protection

# KU OGOW XUQUUQDAADA

# YAA HELI KARA OO XAQ U LEH MAGAN GALYADA CAALAMIGA AH?

LEGAL CENTRE LESVOS

***Ujeedada xaashidan macluumaadka waa in lagu bixiyo macluumaadka guud ee ku saabsan xuquuqdaada habka magangalyada ee Lesvos Greece ee hoos timaad nidaamka xaduudka laga bilaabo Juulaay 2024. Ma ahan mid dhameystiran, waxaa dhici kara  isbedel lagu sameeyo waxaana kugula talineynaa inaad la tashato qareen Giriig ah kiiskaaga magangalyo. Dhinac kasta***

Haddii aad uga diiwaangashan tahay Giriiga inaad ka timid mid ka mid wadamada  Suuriya, Afgaanistaan, Soomaaliya, Bangladesh ama Pakistan, ma yeelan doontid waraysi magangalyo waxaa lagula yeelan doonaa wareysiga ogolaanshaha (turkiga maxaa ka soo waday), macluumaadkan hoosena kuma khuseeyaan (fadlan tixraac Infosheet Ogow xuquuqdaada - Ogolaanshaha WAREYSI SUURIYAAN, AFGHANS, SOOMAALIDA, BANGLADESH, IYO PAKISTAN).

Wareysiga magangalyada waa fursadaada ugu weyn ee aad ku sharaxi karto sababta aad uga soo tagtay wadankaagi iyo sababta aadan ugu laaban karin halkaas. Waxaan kugula talineynaa inaad la tashato qareen ama NGO-yada taageerada xaga sharciga ah bixiya ka hor inta aadan galin wareysigaaga si aad ugu diyaargarowdo

Dalka aad ka timid waa dalka aad u dhalatay, qasab maaha dalkii aad ku dhalatay ama dalkii aad ku noolayd ka hor intaadan iman Giriiga.

Haddii aad tahay bilaa wadan dalkaagii asalka ahaa waxaa loo aqoonsan karaa inuu yahay dalka aad ku dhalatay, ama inta badan aad ku noolayd, ilaa aad u soo gudbiso caddaynta in aad tahay wadan  la'aan sida ugu dhakhsaha badan xafiiska magangalyada, iyo ugu dambayn inta lagu jiro wakhtiga wareysiga.

Marka aad weydiisato magangalyo gudaha Giriiga, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto laba nooc oo magangelyo caalami oo kala ah.

**1. magan galyo qaxooti, ama**
**2.  magan galyo bani aadamnimo**

# 1. Qaxootinimada (ID sadax sano ah iyo baasaboor 5 sano ah)

Waxaad xaq u leedahay aqoonsiga qaxoontinimo haddii aad muujin karto in aadan si nabad galyo  ku joogin waddankaagi sababtoo ah waxaad ka cabsanaysaa cadaadis.

Inta lagu jiro wareysiga magangalyada, waa inaad si faahfaahsan u sharaxdaa haddii aad ahayd dhibane la kulmay cadaadis hore oo kala kulantay wadankaagii ama waa inaad sidoo kale muujisaa in haddii laguu celiyo wadankaagii hooyo, waxaad halis ugu jirtaa in lagu dhibaateeyo mustaqbalka.

**Cadaadisku wuxuu tusaale ahaan noqon karaa:**

- ❑ Falalka xun xun ee jireed ama maskaxeed, oo ay ku jiraan falalka xadgudubka galmo ee lagugu dhaawacay, maskaxiyan ku saamaysay ama kuu diiday inaad si xurnimo ah aad ga'aano u qaadato.

- ❑ sharciga, maamulka, booliska ama nidaamka garsoorka dalkaagii oo ku takooraya.

- ❑ dacwad ama ciqaab adiga ka dhan ah taas oo ah cadaalad darro, ama takoorid, tusaale ahaan inaad iska diidey inaad qabato adeegga milatariga.

- ❑ falalka xadgudubka galmada, gudniinka xubinta taranka dumarka, ilmo iska soo ridida qasabka ah ama dhalmada qasabka ah.

- ❑ falalka ka dhanka ah carruurta ku xad gudbida xuquuqdooda sida askareenta caruurta si qasab ah loogu qaro ciidanka , ama ka ganacsiga carruurta.

**<u>Cadaadiska aad ka baqeyso in aad la kulanto hadii dalkaagi hooyo laguu celiyo waa in uu ku xirnaadaa ama mid ka mid ah yahay sababahan soo socda</u>** (ama sababtoo ah waxaad kugu soo dhacay mid ka mid ah qaybaha hoose ama sababtoo ah waxaa laguu arkaa sidan):

- **Jinsiyadaada/qabiilkaga:** tusaale ahaan, midabkaaga maqaarka awgeed, sababtoo ah waxaad tahay xubin ka mid ah qowmiyadaha laga tirada badan yahay (somali bantu ama jareer timo adag . Gabooye. Midgan yixir .tumaal .eyle . Boon iyo qabiilada kale laga tiro badan yahay la faquuqo .), , ama sababtoo ah waxaad ku hadashaa luqad aan ahayn luqadda rasmiga ah ee Gobolka, iwm

- **Diintaada:** tusaale ahaan diinta aad ku dhaqanto si guud ama si gaar ah waa ka mamnuuc dalkaaga, ama sababtoo ah waxaad la kulantaa takoorid diintaada (tusaale goobtaada cibaadada waa la bartilmaameedsaday, adiga ama dadka kale kugu diinta ah waxaad la kulmaysaa rabshad ama dhibaatayn); sababtoo ah waxaa lagugu qasbi karaa inaad diintada ka baxdo diin kale qaadato; maxaa yeelay wax diin ma aaminsanid.

- **Dhalashadaada:** tusaale ahaan sababtoo ah waxaad tahay qof bilaa wadan ah , sida falastiin, Kurdi, Saxarawi, iwm*.*

- **Fikradahaaga siyaasadeed:** tusaale ahaan, sababtoo ah waxaad ka qabtaa fikrado ka duwan dowladda dalkaaga oo aad si fagaare ah ama baraha bulshada uga soo ban dhigtay , ama waxaa ka tirsan tahay xisbi siyaasadeed mucaarad ah, waxaad ku jirtaa dhaqdhaqaaqyo siyaasadeed ama ururro, waxaad ka qaybgashay mudaharaadyo. , waxaad tahay qof shacab ah, waxaad ka shaqeysay hay'adaha NGO, iwm*.*

- **Xubinnimadaada koox bulsheed oo gaar ah:** tusaale waxaa tahay qof ka jinsi duwan bulshada aad ku dhax nooshahay xaga galmada tusaale waxaa tahay (gay, ama lesbian, LGBT+), lab iyo dhedig (tusaale waxaad tahay naag, waxaad tahay trans qof is jinsi dooriyey nin naag iska dhigay ama naag nin iska dhigtay, laguuma aqoonsan karo nin ama naag kaa doonayso in aad noqoto), dabaqada bulshada ama kooxda (tusaale Dalit ee Hindiya), xubnaha qoyskaagu waxay ka soo jeedaan koox mucaarad ah (tusaale aan raacsanayn dawladda) ama , nooca shaqadaada waxay ahayd (Saxafi, macalin, shaqaale NGO ah, iwm.),

# 2. Bani aadamnimada (ID hal sano ah iyo baasaboor 3 sano ah)

**<u>Haddii aanad u qalmin aqoonsiga qaxoontinimo</u>** (tusaale, khataraha aad kala kulanto dalkaaga hooyo kuma xidhna qaybahan, kuwaas oo hore loo sheegay), waxaad xaq u leedahay inaad hesho magan galyo bani aadamnimo ah, haddii aad khatar dhab ah ugu jirto dalkaaga in ay ku soo gaaraan waxyeelo halis ah.

Tani waa kiiska haddii, tusaale ahaan, dalkaaga aad halis ugu jirto:

- ❏ ciqaab dil ah ama toogasho ama
- ❏ jirdil ama bini'aadantinimada ka baxsan ama si xun lagula dhaqmo ama ciqaab xaqiraad ah
- ❏ khatar ku ah noloshaada sababtoo ah heerka rabshadaha ka jira dalkaaga, oo ay ugu wacan tahay iska hor imaadyada hubaysan (tusaale dagaal u dhexeeya kooxaha maxaliga ah, dagaalka sokeeye, dagaalka u dhexeeya ciidamada caalamiga ah iyo ciidamada dalkaaga).

Isku day inaad sharaxdo sababta heerka qalalaasaha dalkaagu uu adiga shakhsi ahaan kuu saameyn doono. Ka fakar waxa adiga ama qoyskaaga gelinaya khatarta rabshadaha, taas oo aan saamaynayn qof kasta oo ku nool gobolkaaga ama dalkaaga.

# 3. Talooyin kale

Si laguugu helo inaad u qalanto mid ka mid ah labada magan galyo la soo sheegay (qaxooti iyo bani aadamnimo) , waxaa lama huraan ah inaad sidoo kale awoodi karto inaad sharaxdo:

- ❏ **YAA** mas'uul ka ah cadaadiska aad ka cabsanayso, ama waxyeellada halista ah ee aad khatarta ugu jirto, tusaale ahaan: Dawladda ama Wakiil Dawladeed, koox maleeshiyo ah, ama urur ama shakhsi kale oo dalkaaga jooga.
- ❏ **WAA MAXAY SABABTA** aad u awoodi wayday inaad magangalyo ka codsato maamulada dalkaaga ka jira, ama **MAXAY** maamulada dalkaagu u awoodi waayeen inay kaa difaacaan dadka dhibta kuu geesanaya **MAXAA AAD** u awoodi wayday inaad magangalyo ka codsato maamulada dalkaaga. ama **MAXAY** mas'uuliyiinta dalkaagu u awoodi waayeen inay kaa difaacaan cadaadiskan ama khatarta waxyeellada daran, tusaale ahaan: ma sheegi kartid hanjabaadaha aad la kulantay, sababtoo ah ka hadii aad sheegto waxay ku gelinaysaa khatar kale; ma aadan filan karayn in dawladda ku ilaalin karto ku difaaci karto, sababtoo ah dawladu ma maamusho degaankaaga, iwm.

- **SABABTA** aadan ugu laaban karin magaaladaada AMA meel kale oo dalkaaga ah, tusaale ahaan: sababtoo ah kuuma meel amaan aad ku noolaan karto halkaas; sababtoo ah waxaa lagugu takoori doonaa isirkaaga ama diintaada halkaas; sababtoo ah si sharci ah kuma laaban kartid meel kasta oo dalkaaga ah; sababtoo ah ma lihid shabakad ku difaacda ama ku taageerts halkaas; sababtoo ah waxaad leedahay caruur da' yar; *sababtoo ah waxaad tahay qof dumar ah kali ah/waayeel ah/qof aan qaan gaarin; sababtoo ah waxaad la ildaran tahay xanuun ama naafonimo daran (sida noloshaada gaar ahaan dalkaaga ka dhigaysa mid adag, ama tusaale ahaan ma heli kartid daawadii aad u baahnayd); sababtoo ah waligaa ma aadan ku noolayn dalkaagii dhalashada (tusaale somali ku dhashay yamen aan waligisa somaliya tagin ama aan arkin ), iwm.* Sababtoo ah waxaad tahay qof dumar ah aaan Rabin in ay guursato nin waayeel ah.

Xaaladaha qaarkood, falalka uu qofku ka sameeyo waddankii uu asal ahaan ka soo jeeday waxay la macno tahay in aanu xaq u lahayn magangalyada caalamiga ah. Tani waa xaalad haddii aad gashay dambiyo culus.

**WhatsApp:** +30 694 961 8883
**Landline:** +30 225 1040 665
**Iimaylka:** info@legalcentrelesvos.org
**Facebook:** www.facebook.com/LesvosLegal
**Cinwaanka xafiiska:** Komninaki 20, Mytilene 81100 **Saacadaha shaqada :** Isniinta ilaa Jimcaha - 10 subaxnimo ilaa 2 galabnimo